Ku socota dhammaan shaqaalaha (magaca goobta shaqada): _____
Ka socota (magaca loo-shaqeeyaha): _____

Notice to Workers of Form I-9 Inspection
(Ogeysiis ku socda Shaqaalaha oo ku saabsan Kormeerka Foomka I-9)

The Immigrant Worker Protection Act (Sharciga Ilaalinta Shaqaalaha Soo-galootiga ah) Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo muraajiciyay ee Washington 49.97) waa sharci ka jira gobolka Washington kaas oo kaga baahan loo shaqeeyayaasha inay ogeysiis ku siiyaan shaqaale kasta oo ku saabsan kormeerka Foomka I-9 ee federaalka ***Shan maalmood oo shaqo (5)*** *gudahooda ay ku helaan ogeysiis kormeer ah. Dukumiintigan taariikhdiisu tahay (MM/DD/YYYY): _____, waa ogeysiis ku saabsan kormeerka Foomka I-9.*

FIIRO GAAR AH: Loo shaqeeyahan wuxuu helay ogeysiis ku saabsan kormeerka foomka I-9 oo ay samaynayso hay'adda federaalka ee soo socota (ama hay'adaha federaalka ee soo socda):

☐ Department of Homeland Security (DHS, Waaxda Amniga Gudaha)
- ☐ Immigration and Customs Enforcement (ICE, Hay'adda Dhaqangelinta Shuruucda Socdaalka iyo Kastamka)
- ☐ United States Citizenship and Immigration Services (USCIS, Adeegyada Dhalashada iyo Socdaalka ee Mareykanka)

☐ United States Department of Labor (DOL, Waaxda Shaqada ee Mareykanka)
☐ Wax kale: _____

Ogeysiiska Kormeerka waxaa la helay taariikhda markay ahayd (MM/DD/YYYY):
_____

Ujeeddada kormeerka inta uu loo shaqeeyuhu ogyahay:
_____
_____
_____

Hay'adda federaalku waxay codsanaysaa in loo shaqeeyahan uu diyaariyo noocyada diiwaannada ee soo socda si ay qayb uga noqdaan kormeerka (inta la ogyahay, calaamadee dhammaan kuwa khuseeya):

☐ Foomamka I-9
☐ Dukumiintiyada taageeraya ee Foomka I-9 (sida nuqullo baasaboorro, shatiyo darawalnimo, kaararka sooshiyaal sekuuritiga, kaararka deganaanshaha joogtada ah)
☐ Diiwaannada nidaamka elektarooniga ah ee foomka I-9 iyo diiwaanka raadraaca hawlaha nidaamka
☐ Diiwaannada iyo xogta mushaharka (oo ay ku jiraan magacyada shaqaalaha, lambarrada sooshiyaal sekuuritiga, taariikhaha shaqaalaynta)
☐ Liiska shaqaalaha hadda jira (oo ay ku jiraan magacyada, lambarrada sooshiyaal sekuuritiga, taariikhaha dhalashada, taariikhaha shaqaalaynta, iwm.)
☐ Liis kasta oo shaqaalaha shaqada laga joojiyey ah (oo ay ku jiraan magacyada, lambarrada sooshiyaal sekuuritiga, taariikhaha dhalashada, taariikhaha shaqaalaynta, iwm.)

☐ Liiska qandaraaslayaasha madax-bannaan iyo/ama iibiyeyaasha
☐ Qoraal kasta oo ka socda Maamulka Sooshiyaal Sekuuritiga oo ku saabsan lambarrada sooshiyaal sekuuritiga ee aan xogta la waafaqayn ama aan wax xog ah oo u dhiganta la helin
☐ Dukumiintiyo ama isgaarsiin muujinaya ka qaybgalka E-Verify ama Social Security Number Verification Service (Adeegga Xaqiijinta Lambarka Sooshiyaal Sekuuritiga)
☐ Diiwaanada shirkadaha / ganacsiga
☐ Macluumaad kale ama dukumiintiyo muujinaya ama aqoonsada shaqaalaha ama xogtooda shaqsiyeed (fadlan si kooban u qor oo sharax): _____

_____

_____

_____

_____

_____

Nuqul ka mid ah Notice of Inspection of Form I-9 Employment Eligibility Verification (Ogeysiiska Kormeerka Foomka I-9 ee Xaqiijinta U-qalmitaanka Shaqada), iyo dukumiintiyo la socda, ayaa lagu lifaaqay ogeysiiskan.

Shaqaaluhu waa inay kala hadlaan dhammaan arrimaha sharciga iyo su'aalaha la xiriira xaaladahooda gaarka ah qareen. Haddii aad raadineyso talo ama aad qabto su'aalo ku saabsan habka kormeerka I-9, macluumaadka hoose ayaa noqon kara mid waxtar leh:

- Deportation Defense Hotline (Khadka Difaaca Masaafurinta) ee Washington Immigrant Solidarity Network (WAISN, Shabakadda Garab Istaagga Dadka Soo-galootiga ee Washington): 1-844-724-3737. Saacadaha: Isniin ilaa Jimce, 6am ilaa 6pm. Turjumaad ayaa laga heli karaa ku dhawaad 300 luqadood. Macluumaadka Know Your Rights (Garo Xuquuqahaaga), gudbin laguugu gudbinayo adeegyada sharciga iyo agab, iyo adeeg qof ku weheliyo. https://waisn.org/what-we-do/deportation-defense/hotline/
- The Northwest Immigrant Rights Project (NWIRP, Mashruuca Xuquuqda Soo-galootiga Waqooyiga Galbeed) wuxuu bixiyaa adeegyo sharci iyo u doodista xuquuqda dadka soo-galootiga ah ee ku nool gobolka Washington. Waxaa lagala xiriiri karaa iimayl ahaan iimaylka: info@nwirp.org. Si aad u hesho caawimaad dheeraad ah oo ka socota NWIRP, fadlan booqo: https://www.nwirp.org/get-help/
- Ururo iyo ilo dheeraad ah ayaa laga heli karaa: atg.wa.gov/iwpa